

Dikt av Xaaji Aden om naturen

Gabaygan hoose ku qoran waxaa AHN xaaji aadan u tiryey Gobolka sanaag 1960kii wakhtigaa wefdi dawladda ka socda oo gobolka booqday , isaga oo kaga waramaya khayraadka dabeeciga ah ee gobolku leeyahay oo aan cidna la wadaagin iyo waxqabad la'aanta maamulkii jirey xiligaa .

Taariikhdu waynoo misbaax maanka caawimae
Adoo malee gudaayaa yaqiin marar ku gaadhaaye
Dalkeena waxawgu mudan ceerigaab uguna muuqdheere

Waa makhirkooskii la degey maran laa koobay
Raadkii dadkii hore dhigiyo madhaxii baa yaalle
Mandarkiyo jamaalkaad labnaan ugu malaysaaye
Naakhiyo hawada waxay ka tahay mawsalta ciraaqe
Arweelo meeshay degtiyo mulugi geelweyte
Iyo waxaa naasiir ku jira mawd la halayey
Maanla'aha iyo taalooyinkaad aqalo moodayso
Meelihii jinsiga lagu qarshay maangadaw tahayee

Maduuniyo godqoranaa ninkii marayba yaabaaye
Maageer waakaa daryare maagga la arkaaye
Dhamaan meeshanay degi jireen magaca somaali

Mandarka ciise ceelayye waa kaa masaarka leh
Isir ciise marinkii dibgax buu meel ku leeyahaye
Jiidali maqaamkii subeer baa u moosinaheee

Muftaaxii karaamada kuwii midigta loo saaray
Muftigii isxaaq baa degiyo mudanki daarroode
Waa meel laka ah oo biyo buur madawba lehe
Marmar weeye dhagexeedu iyo muunad gooniyahe
Miila dooxa ay leedahay aymidho kaa beermaaneee

Markaad maxa surudeed tagtiyo meesha ugu taagaan
Badda waxa maraayoodhan baa kuu muraayada he
Madhfaca laga ridaa wuxuu socdaa kuman maasafoodee

Milaterigu meeluu degoo mihima weeyaane
Muntasaha marsiyo daalo waa lagu marqaamaaye
Mayay baa ka da'a gooray tahay milayga jiilaale
Daruurta oo manjaha soo rogtiyo waqayga mayl gaadha
Sida mawjadiyo doonayahay mar isu jiidhaaneeeeee

Dhirta qaar midaba leeyihiyo man iyo awraaqe
Maawered in lagu daadiyaad uduga moodaaye
In aroski aad soo gashiyo malidkii nebiga
Miski baa ka ura kaynta iyo malafka geedaayeee

Shinbiraha mukhtalifka u ciyaay midiba heesqaado
Oo midabka kala gooniyyoo cadad mayuun gaadha
Mawgiyo siyaaxaad ardiyo macalin moodaayeeeee

Qooley ku madadaalisiyo muuradaa badane
Goortuu gobyahan waa murdiye gooni miranaayo
Oo uu gumrigu sawd macaan meel fog kala yeedho

Oo gorog mayuusiga tumoo galaw ku maaweelsho
Oo marisku kuu soo waramo meesha waxa jooga
Aabahaa madixiisa iyo maqasho daa'uuska
Adigiyo naftaadaa murmoon doonin meel kale eeee

Dayib mudhay mataanaha dhosoqay marinka guudkeeda
Maraaraale dhamaskiyo shini ur midabka yaaquudle
Manka ubax dibawgay shinidu miida ka abuurto
Miyeelihiyo geedgaalka iyo mooligiyo xiiska
Masada iyo guubalida iyo sheyda midheheeda
Maqaariga abeesada diliyo wegerka moohaaya
Moxorka oo lubaan laga gurtiyo maydigiyo fooxa

Dhirta milixa wada yeelatee maanku ku hagaago
Muda hadii la dhigo sorta aan midabku doorsoomin
Intaas oo manfaca ba jirto waa la moogyahaye
Madaar iyo marsiyo laydh maliyo baan macaamilo e
Miinshaarta qoriga hakii miilar dhigay taalle
Waxay mihindisyadu soo diraan riigay maadhiyeene
Waa miilo cagaftay ilkaha maqan yihiin qaare
Hadaad maanta noo timise waa mahad ilahaye
Maanshaa allee wax u dhamay waa madawdahayeeee
Suáalo:

Ka faalood dulucda gabaga?